



waan
**difaaci karnaa
marinadeena biyaha**

ayadoo la qaadayao keliya
dhawr talaabo.



**Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha
(888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater si aad u hesho WPO.
www.sandiegocounty.gov/awm/awq si aad u hesho Amarka Beeraha**

Xarumaha iyo Baararka Khamriga

Barnaamijka *Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego* ayaa ka taageeraaya ganacsiyada dedaaladooda kahortaga wasaqda asagoo siinaaya Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Biyaha Daadka (BMP-yada).

! Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijaroorada, iyo biyaha daadka roobka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhamaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka. *Tilmaamahaan kormeerka ganacsigaaga gaariyaasha ayaa naga caawin doona nadiifinta marinadeena biyaha.*

Kahortaga Ciid guurka

- Dhaqan geli BMP-yada kahortagaaya ciid guurka iyo xakamaynta xaalufinta qaruuraxa. BMP-yada waxaa ku jira beerista nagaarka daboolka, ku shubida dhoobada, ama ku darista qashinka la bacrimiyay si koo kobciyo ciida caafimaadka qabta meelaha gawaanka noqday ama meelaha u dhixeyya geedahaaga. BMP-yada kae waxaa ku jira adeegsiga duubabka fibarka, difaaca jaayga, maaraynta dagaandegyada, iyo geedaha lagu meegaaro meesha.
- Maaree wasaqda dhirta adoo ku bacriminaaya meesha ama qasacda geedaha u aruurinaaya bacriminta.

Adeegsiga Sunta Beeraha iyo Cayayaanka

- Raac tilmaamaha ku qoran daawada sunta cayayaanka iyo beeraha si aad u hesho tilmaamaha adeegsiga iyo daadinta saxda ah.
- Haku shubin sunta cayayaanka inta lagu jiro ama kahor xiliyada cimiladu isbadelayso ayna ku jiraan xiliga dabaysha ama roobka keenaaya in sunta cayayaanku ka yaacdoo ama ka leexato aaga loogu talagalay.
- Ku shub sunta beeraha ee nitrogen ta si sax ah, inta lagu jiro xili beereedka ama miro gurashada. Haku shubin sunta beeraha inta lagu jiro mudada roobka ama biloowga gu'ga.
- Si looga hortago wasaqda ka timaada sunta bacriminta beeraha, keliya adeegso cadadka sunta ee loo baahan yahay.

tilmaamo dheeraad ah >>>

Maamulka Qashin Saarka

- Ilalii aagaga banaanka kaydka oo xaqiji in qasacyadu dabool adag leeyihiin oo aysan dilaacin. Dhig aagaga kaydka meelo ka fog daadka roobka ama waraha biyaha.
- La soco isticmaalka biyaha ee aagaga wax soo saarka. Abuur aaga sanbalka si aad u hubiso in qashin saarku leeyahay pH ta saxda ah kahor intuusan gelin nidaamka bulaacada.
- Raac shuruudaha qashin saarka ee gobalka oo dhan si aad u adeegsato wasaqda khamriga. Adeegso qaabka ku dhaqanka oo sida ugu haboon u waafaqsan goobta iyo xajmiga goobtaada khamriga.
- Ka qaybgal kulannada xog bixinta ee ay qabtaan Gudiyada Biyaa ee California si aad wax badan uga barato ruqsad bixinta iyo dukumiintiyada saxda ah. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo <https://www.waterboards.ca.gov/>

! Ku siidaynta wasaqda si toos ah ama si dadban nidaamka biyaha roobka qaada ama marinnada biyaha waxay kasoo horjeedaa Xeerka Ilalinta warta biyaha ee Ismaamulka (WPO).

Ganacsigaaga waxaa laga doonayaa inuu ku dhaqmo WPO iyo shuruudaha kore ee ugu yar ee BMP-yada.

Waan
difaaci karnaa
marinadeena biyaha
ayadoo la qaadayao keliya
dhawr talaabo.

Waad ku mahadsan tahay
inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.



Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater si aad u hesho WPO. www.sandiegocounty.gov/awm/awq si aad u hesho Amarka Beeraha